

Ruqsada Seattle

-qeyb ka mid ah taxanaha waaxyada-badan ee ku qoran adeegyada Magaalada iyo shattiyada

Furfurida Taangiyada Saliida Diiriyaha Dadka Deegaanka ah

Waxaa la cusbooneysiinta Maarso 2024

Haddi aad leedahay haanta saliida kululaynta ee goob deegaan ah oo aan la isticmaalin, waxaa lagaa rabaa inaad "furto" haanta iyo tuubooyin kasta oo ku xidhan. Gaar ahaan, Qaybta 5704.2.13 ee Xeerka Dabka Seattle 2021 waxay u baahan tahay in la kala gooyo haamaha aan shaqaynaynin sanad ama ka badan.

Joojinta shaqaynteeda waxaa lagu fulin karaa mid kamid ah labada hab: (1) saarista, ama (2) meel kaga tagitaan. Wax badan macluumaadka ku saabsan doorashooyinkan waxaa lagu bixiyaa qeybta "Shuruudaha Xeerka Dabka ee Seattle" ee dhukumiintigan.

Qaybta 105.6.18 ee Xeerka Dab Damiska Seattle ee 2021 wuxuu sidoo kale dhigayaa in ruqsad loo qaato taangiyada saliida ee kulayliyaha laga baxay, laga guu-ray, sida kumeel gaadhka ah aan u shaqaynin ama sida kale la iskaga daayay.

Ruqsadaha-nidaamka iyo Kharashka

Kahor inta aan la furfurin taangi kasta oo saliida kulayliyaha ah, Koodhka Ruqsada 6103-Furfurida Taangiyada Saliida ee Kulayliyaha waa in laga helaa Waaxda Dabdamiska Seattle (Seattle Fire Department, SFD). Ruqsadaha waxaa la siiyaa dadka ama qandaraaslayaasha loo ogol yahay inay qabtaan shaqada, sida lagu sheegey arjiga ruqsada. Ruqsadaha lama siiyo mulkiilaha guriga, iyada oo qofka uu haysto shahaado furfuritaan iyo qabashado shaqada ah moojee.

[Lasoo deg foomamka arjiga](#) oo iimeel ugu dir permits@seattle.gov oo ku bixi [kaadhka daynta onleyn ahaan](#). Ama waxa aad boosta ku dirtaa arjigaaga buuxa oo uu la socdo jeeg aad u qortay "City of Seattle)" boosta:

Seattle Fire Department
Fire Prevention Division - Permits

220 Third Avenue South, 2nd Floor
Seattle, WA 98104-2608

Arjiga ruqsada ee buuxa waa laga shaqayn doonaa, shaambadayn doonaa *Approved to Proceed (Loo ansixin Doonaa In Laga Shaqeeyo)* oo waxaa lagu celin doonaa shirkada dalbaday Foomka Warbixinta Furfurida Taangiga Saliida.

FIRO GAAR AH: Wax ruqsad ah lama bixin doono wixii ka danbeeya shaqada furfurka taangida marka la sameeyo. Lama bilaabi karo ilaa inta arjiga ruqsada Waaxda Dabdamiska la shaambadeeyo oo *Approved to Proceed (Loo ansixin Doonaa In Laga Shaqeeyo)* oo uu helo dalbaduhu.

Shuruudaha Xeerka Dab-damiska Seattle

Shaqada furfurista waa inayna bilaabmin ilaa inta arjiga ruqsada loo shaambadaynayo *Approved to Proceed (Loo ansixin Doonaa In Laga Shaqeeyo)* oo uu ka heleyo dalbaduhu. Shaqada furfu-rista waa inuu qabtaa, ama uu kormeeraa, shakhsi haysta shahaadada Gudida Xeerka Caalami (International Code Council, ICC) ee furfurista taangiga kaydka dhulka hoostiisa (underground storage tank, UST).

Nuqulka shahaadada shakhsi ahaaneed ee ICC ee iminka waa in lagu xareeyaa Waaxda Dabdamiska Seattle. Shahaadada ICC ee furf-urista waa in la dhigaa meesha taangiga inta ay socoto shaqada furfuristu. Shardigan -waxa uu khuseeyaa ka saarida taangiga iyo kaga tegi-da meesha.

Labadaba ka tegida iyo ka saarida la qorsheeyay waxaa weeye qaabab loo furfuro oo loo sameeyay wixii ujeedo ah Xeerka Dabka Seattle. Haddii in meesha lagu daayo ay tahay qaabka la doortay ee furfuristu, taangiga waa in laga buuxiyaa adke wax ah gudhihiisa (sida, ciid, sagbad, buush, imw.). Marka meesha lagu daynayo taangiga, gudaha taangiga waa in la dariyaa oo la maydhaa si looga nadiifiyo hadhaaga wixii ku hadhay gudaha iyo xaga hoose. Dalbayaashu waa inay si taxadir leh u eegaan ikhtiyaaradooda waxa ku jira kahor inta ayna dooran qaabka furfurista. Taangiyada looga shakisan yahay inay

www.seattle.gov/fire

Fire Prevention Division
220 3rd Avenue South
(206) 386-1450



liigayaan waa in meesha laga qaadaa halkii lagaga dayn lahaa. Waaxda Dabdamiska Seattle ma saadaalin karto, oo iskuma daydo inay saadaaliso, waxa shuruucda mustaqbalku ay noqon karaan ee furfurka taangiga ee la samayn doono ee kuwa wakhtigan ka farcamay. Hadii taangiga meesha lagaga tago waxaa hadhaw loo baahan doonaa in laga qaado iyada oo kharash kale la bixinayo oo uu keeni karo waxyeelo.

Foomka Warbixinta Furfurista oo uu la socdo ruqsada la ansixiyay waa inuu buuxiyaa hawladeenka furfuraya oo haysta shahaadada ICC ee Taangiga Kaydka Dhulka Hoostiisa - ee shaqada qabanaya ama kormeeraya shaqada. Foomkan waa inuu ku soo celiyaa Waaxda Dabka furfuraha shahaadada ICC haysta mudo 30 maalmood gudahood ah marka loo buuxiyo furfurista.

Si loo duwaan geliyo taangiga la furfurayo, mulkiilaha hantidu waa inuu haystaa nuqulka *Foomka Warbixinta Furfurka Taangiga ah* iyo arjiga ruqsada oo shaambadaysan oo ah *Approved to Proceed (Loo ansixin Doonaa In Laga Shaqeeyo)*, iyo sidoo kale dhamaan risiidhada, shahaadooyinka iyo qoraalka macluumaadka ee la xidhiidha mashruuca.

U hogaansanka Xeerka Dabdamiska Seattle ma wajabinayo in lasoo gudbiyo qorshaha goobta ama in la qaado wax muunad ciida ah. Laakiin, mulkiilaha hantida ama hawladeenku waxa uu yeelan karaa wajibaad kale, oo ay ku jiraan laakiin ayna ku xadidnayn, shuruudaha ka warbixinta wixii daata ama liigid ah iyo shuruudaha nadiifinta oo hoos yimaada shuruucda deegaanka ama shuruuc kale oo qayb ka ah Xeerka Dabdamiska Seattle. Tusaale ahaan, wixii taangi ah ee liiga, Department of Ecology (Waaxda Deegaanka) ee Gobolka Washington waxay leedayahay shuruudo- dhigaya in laga warbixiyo ee wixii sunta banaanka ee la arko ah. Northwest Regional Office (Xafiiska Deegaanka Waqooyibari) ee Waaxda Deegaanka waxaa lagala xidhiidhi karaa (206) 594-0000. Waaxda Dab-damiska Seattle kuma matasho sharciyada kale, oo waxaa weeye masuuliyad saaran mulkiilaha hantida ama hawladeenka inuu ogaado shuruucda khuseeyo kiiskooda.

FIIRO GAAR AH: Waxaa weeye masuuliyad saaran furfuraha haysta shahaadada ICC ee sameynaya ama kormeeraya shaqada furfurka inuu u keeno nuqul *Foomka Warbixinta Furfurka Taangiga Saliida Kulayliyaha* mulkiilaha hantida mudo 30 maalmood gudahood ah marka uu dhamaystiro shaqada. Dalbadaha ruqsada waa inuu siiyaa nuqul ruqsada ah oo shaambadaysan oo ah *Approved to Proceed (Loo ansixin Doonaa In Laga Shaqeeyo)* mulkiilaha guriga.

Shahaadada Gudida Xeerka Caalamiga ah

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo/ama helitaanka arjiga si loo noqdo Furfuri UST oo Shahaadada ICC haysta, la xidhiidh Waaxda Shahaadada ICC ee 1-888-ICC-SAFE (422-7233) ama www.iccsafe.org. ICC waxay siin doontaa -qodobada cida la siiyo oo bixiyaha faahfaahinta u diyaar garawga imtixaanka, gelitaanka imtixaanka, iyo helitaanka shahaadada.